# WAHSI TIRE



Wahsigu Waa Tuugga Wakhtiga

CABDIRAXMAAN BASHIIR SIYAAD
(CABDIRAXMAAN CIRRO)

**Copyright© Cabdiraxmaan Bashiir Siyaad 2019.**
Buug yarahan waxaan ugu talagalay in qaab electronic ah u baahiyo sidaas darteed Qof kasta oo u baahdo inuu daabacdo buug yarahan wuu daabacan kara isaga oo ilaalinaya xuquuqda lahaanshaha buugga.

**Kala Xidhiidh:**

**ADDRESS**: JIGJIGA, SOMALI STATE.

**MOBILE**: +251915781200

April 6, 2019.

## Wahsigu waa tuugga wakhtiga.

Dhiganahan kooban waxaynu ku  dul joogsan doonnaa wahsiga iyo caajiska. Aan ku bilawno su'aallo kala duwan oo dadku iswaydiiyaan, balse inta badan jawaabahooda ay isku waddo mariyaan.

1. Waa maxay wahsi?
2. Waa maxay caajis?
3. Waa maxay farqiga u dhexeeya wahsi iyo caajis?

Haddii aan ku bilowno wahsi:  wahsigu waa daal maskaxeed ku dhaca dadka, Kaasoo yareeya doonista iyo firfircoonida shaqsiga.

Caajisku waa daal jidheed ku dhaca dadka, kaasoo keena  wax qabad la'aan qofka oo doonaya in uu wax xaqiijiyo. Caajisku darajo ahaan waa uu ka hooseeyaa wahsiga. Waa tamar darro ruuxi ah oo ku dhacda awoodda qofka.

Wahsi iyo caajis waa laba erey oo kala duwan dhawaaq ahaan iyo macna ahaanba, laakiin qoraallo badan aad ku arkayso labadan erey oo isku macno ah, qoraayaduna ay isticmaalaan kolba kii carrabkooda ku soo horreeya.

قال ابن حجر في الفتح: "الفرق بين العجز والكسل،

ان الكسل ترك الشيء مع القدره، والعجز عدم القدره."

Ibnu Xajar markuuu kala saarayay laba erey waxa uu ku macneeyay sidan: "wahsigu waa qofka oo waxba qaban kari waaya isaga oo awooddii iyo xooggii leh, cajisku waa qofka oo doonaya in uu wax qabto haddana aan awoodayn."

فقد ذكر العيني في شرح سنن ابي داو.

عند شرح حديث: "لللهم إني أعود بك.

من العجز والكسل" دكر- ان العجز هو عدم القدره علي فعل الخير،

والكسل هو عدم انتفات النفس للخير وقلة الرغبه فيه مع امكانه.

Sheekh Cayni Eebbe ha u naxariistee waxa uu ku sheegay sharaxa sunanu Abii Daa'uud markii uu sharraxayay xadiiska:

"Ilaahow waxaan kaa magan gali caajiska iyo wahsiga",

Waxa uu ku macneeyay "caajisku waa  qofka oo awoodi waaya ficilada khayrka, wahsiguna  waa nafta oo aan isu dirayn waxa wanaagsan iyo rabitaanka qofKa oo yaraada isagoo wax suurto galin kara."

وفتل الشيخ: محمد بن صالح العثيمين -- رحمه الله---

الفرق بين العجز والكسل، ان الكسل ضعيف من الارده،

والعجز ضعيف من البدن.

Sheekh Muxammed Binu Saalix Al Cusaymiin Eebbe ha u naxariistee  ayaa u kalasaaray labada  erey sidan: "wahsi waa qofka oo ka liita dhankaa doonista, caajiskuna waa qofka oo ka liita  awoodda jidhka."

# Wahsi

Haddii aynu soo qaadanno "wahsi" waa mid ka mid ah xanuunnada macnawiga ah ee faraha ba'an ku haya bulsho waynta caalamka, waxaana la sheegaa in dhammaan dadka laga helo dabeecaddan wahsiga, laakiin lagu kala duwan yahay heerka uu gaadhsiisanyahay.

Binii-aadamku waa noole aad u raaxo jecel, sida oo kalena aad u horumar jecel. Waa laba ammuurood oo aad u kala durugsan maah'maah Soomaaliyeed baa odhanaysa:

"Dhib dabadii bay dheefi timaaddaa ". Halkaa waxaa innooga cad in dhibka, rafaadka, quus la'aantu ay tahay waddada lagu gaadho guusha, raaxada iyo horumarka. Waddadaas hareeraheeda waxaa daadsan oo buux dhaafiyay wahsi oo doonaya inuu wakhtiga kaa dilo dabadeedna kuu horseedo fashil, guul darro iyo mustaqbal madow.

Dadku waxa ay xidhiidh daciif ah, oo raad gadasho ah ka dhaxaysiiyaan wahsiga iyo samirka. Iyaga oo u maraya odhaahyada ay ka mid ka yihiin “things come to those who wait” oo ah “fursaduhu waxa ay u yimaaddaan kuwa suga”. Xikmaddan waxa ku cudurdaarta dadka jecel in ay ka wahsadaan fursadahooda

iyo hawlahooda daruuriga ah. Odhaahduna macno ahaan waa ay ka xeel dheertahay sida loo adeegsaday markan. Waxa ku qarsoon ‘samir’, taasi oo macnaheedu yahay qofka dedaala laakiin aan niyad jebin, fursaddana wakhtigeeda ku sima ayaa fursadaha wanaagsani u yimaaddan. Samirka iyo wahsigu waa laba kala fog oo aan la is la xidhiidhin karin. Waana sababta samirku guul ugu hoggaamiyo qofka, wahsiguna dib-u-noqosho u hor seedo. Farqiga intaas le’eg ma noqon karo mid wax la wadaajiyo oo bar-kulan leh.

Caadada wahsigu waa mid cadaadis badan soona noqnoqota. Dhanka kale waxay aqoonyahannada kasmo nafeedda ku talaxtagay tibaaxaan, in dadka wahsadaa (procrastinators) yihiin kuwo aan deganayn, oo warwar iyo walaac u saaxiib ah, neecawda raaxada nafsaaniyadduna ku yartahay.

**Noocyada wahsiga:** wahsigu waxa uu dadka ugu dhacaa siyaabo kala duwan, waxaana la gu soo koobi karaa labo nooc oo waawayn kuwaas oo kala ah:-

1: Wahsi saameeya dabeecada qofka (Behavioral Procrastination) Wahsiga noocan ah waa mid aad u xun, wuxuuna ka dhigaa qofka mid markasta diida inuu ficil sameeyo isagoo isku qancinaya inay jirto cagabad hortaagan. Tusaale ahaan in qofku iska dhaadhiciyo in uu wakhtigu ku yaryahay oo uu san hawl qaban karin, ama

naftiisa ka dhaadhiciyo oo uu cududaar uga dhigo in uu san awoodin innuu hawshaas qabto oo ay u baahan tahay awood iyo xirfad uu san isagu lahayn. Dadka uu ku dhoco wahsiga noocan ahi inta badan waa dad kalsooni yar markastana ku fashilma inay wax qabtaan, hase ahaatee markasta fashilkooda sabab usameeyä.

Waxaa kaloo ka mid ah dabeecadaha wahsiga; inaad hawl qorshayso, abaabusho,  kaddibna aad bilowdo, islamarkaana aad joojiso adoon ka helin faa'iidadii laga rajaynayay ee lafilayay inay kasoo baxdo, sababo la xidhiidha wahsi huwan adkaysi la’aan, dulqaad yari, dhib nacayb iyo raaxo jacayl.

Wahsiga noocan ah oo sababa khasaare maskax, maal iyo muruq ba leh.  Uur-baadhayaal Cilmi baadhis ku sameeyay xidhiidhka iyo saamaynta ka dhaxaysa dhaqaalaha iyo dabeecadda, waxay ku taliyeen "in aan la bilaabin hawl haddii aan la dhamayn karin".

2: Wahsiga saameeya go’aanka qofka (Decisional Procrastination)

Dadka uu ku dhoco wahsiga noocan ah waxaa ka luma go'aanka wayna ku adagtahay inay wax qabtaan, dadkani waxay aad uga baqaan inay khaldamaan, waxayna raadiyaan mar walba in ay helaan xaalad jawi daggan oo ay waxkasta saxaan kahor inta ayna wax qabanin, taasina way ku adkaataa kadibna waxay ku kaliftaa in ay noqdaan wax qabad la'aan.

**Maxaa keena wahsiga?**

Rabitaanka nafta oo ah in ay seexato, cunto, cabto, oo aynan waxba qaban waxay raalli galiysaa shaydaanka, heshiiska labadani wuxuuu kuu horseedaa

1: Nafta oo hagaanka kuu qabata, maxaayeelay naftu majecla rafaadka shaqada, gaajada, hurdo la aanta I.w.m.

Haddi aad naftaada xagamayn waydo oo ay hoggaanka ama majaraha kuu qabato, suurto gal ma aha in aad ku dhaqaaqdo wax aysan raali ka ahayn, taasina waxay kuu horseedaysaa wahsi joogta ah iyo wax qabad la'aan, illaaa aad ka noqoto qof u nool kaliya cabidda iyo wax cunidda.

2: Qorshe la'aan: dad badan ayaa waxay ku nool yihiin nolol bilaa qorshe ah, taas oo ka dhigta in aysan dhadhamin macaanka nolosha oo ay noqdaan kuwo mar kasta kalifan, qaxar iyo dhib ku jira haddana aan qaban wax hawl ah oo la taaban karo.

Waxyaabaha u badan ee bulshadeenna ku keena wahsiga waa qorshe la'aanta, iyagoon hawsha eegin qorshe lagu yar yaranayo aan samayn siday u kala culus tahay aan ogayn, si loo kala hormariyo aan war ka hayn, ayay iska dhex cararaan taasina waxay ku sababtaa wahsi, quus iyo fashil joogta ah.

3: Dib-u-dhigashadu: waa ficillo u la kac ah oo aan gadaal ugu dhiganno hawlaha innoo yaalla.

Dib-u-dhigasho waa inaad dib u moostaa hawl kuu qorshaysnayd inaad qabato wakhti cayiman, iyadoo ayna jirin wax sabab ah oo keenay dib u dhigaas, illaa ay kagaadho heer ay hawluhu bataan naftuna kugu qanciso ma qaban kartide iska dheerayso barkinta.

Saamaynta dib-u-dhigashada waxaa kamid ah hawlaha la qabto way kala darojo hooseeyaan ama kala dhib yar yihiin haddii aan raacno hawada nafta waxay doorbidaa qabashada hawlaha fudud, wakhtiga yar u baahaan, aan dhibka badan lahayn, ee lagu dhex nasan karo. Halka ay naftu jeceshay in dib loo dhigo hawlaha culculus ee xiiso nafeeddu ku yartahay. Hawl kasta oo daba martaa wakhtigii loo qorsheeyay, waxay noqotaa mid caqabad abuurta marka danbana wakhtiga ku cidhiidhida ama kaa lumisa wakhtiyo kale oo aad hawlo muhiim ah ku qabsan lahayd, waxaana dhacda inay dib u xallinteedu adkaato ama lunto.

Mar kasta  oo aan cududaar u helno dib-u-dhigidda hawl maanta inoo taalla si aan barri qabano, waa xilliga aan ku sii anbanayno dariiqaan ka gali lahayn xaydaabka wahsiga.

Goortaan baranno sida loo joojiyo dib-u-dhigashada aan loo baahnayn waa marka aan helnay jihadii iyo waddadii aan ooga bixi lahayn xaydaabka wahsiga iyo dib-u-dhigashada.

Hawl kasta oo dib loo dhigaa waa mid keenta in laga daallo ugu danbayna lagu guul daraysto.

4: Shaqo la'aanta (bilaa camalka): Shaqo la'aantu waa waxyaabaha ugu badan ee qofka ku keenta wahsiga iyo cago jiidka, waayo shaqadu waa shayga kaliya ee qofku ku dareemo isku filaansho iyo daganaan maskaxeed.

Haddii aanad wax camal ah haynin wax walba wuu kugu adkaanayaa ugu danbayntana isku buuq iyo kalsooni darro ayaa ku gu dhacaya ku guna keeni kara wahsi tiro beel ah.

5. Kalsooni darro: Kalsoonidu waa awoodda uu qof ku qaban karo shaqo kuna hawl gali karo, taas oo u saamaxaysa qofka inuu noqdo mid dagganaani ka muuqato mar kasta oo uu hawlgalayo. Kalsoonida qofku mar kasta oo ay yaraato waxa ku dhaca cabsi, wahsi iyo u habrasho hawlo badan oo uu qaban karo, taas oo ugu danbayn qofka ku keenta wahsi aad u badan.

6. Xidhiidhka naftaada aad la leedahay oo yaraada. Inaad naftaada xidhiidhkeeda xoojiso oo aad la sheekaysato dareentana cabashadeeda oo aad fahanto waxyaalaha caqabada ku noqon kara iyo waxyaalaha u wanaagsan, waxay kuu saamaxaysaa innaad isla jaanqaadi kartaan adiga iyo ruuxdaadu, taas oo kuu horseedaysa guul, mar kasta oo uu yaraado ama joogsado xidhiidhka aad la leedahay naftaada waxaad dareenta xannuuno nafsaani ah sida: Shaki badan, isku buuq, kalsoori darro iyo fikir aan jiho lahayn.

7. Cibaado yari: Qof walba oo muslim ahi hantida ugu qaalisan ee uu haystaa waa limaanka, cibaadaduna waa shayga kaliyaata ee lagu kobciyo iimaanka. Haddii aad yarayso xidhiidhka aad Ilaahay la leedahay waxa ku fuulaya wahsi joogta'a, daal badan, walbahaar, isku buuq, cabsi aan la garnayan meel ay ka timid, daganaansho la aan iyo wax yaallo kale oo badan.

**Sidee loo xallin karaa ama looga hortagi karaa wahsiga?**

Dhammaan sababaha keena wahsiga ayaa looga guuleysan karaa in aad samaayso waxyaabahan:-

1. Hadaf: waa in aan yeelanaa hadaf iyo meel aan doonayno inaan so taabano nolosheenna, inaga oo raacinayna go'aan dhab ah iyo dadaal joogta ah oon ku xaqiijinayno hadafkeenna. Dadaalka ayaa muhiim u ah dabargoynta wahsiga, waxa uuna keenaa natiijo lagu qanco taasoo laga gaadho wahsiga.

2 Qorshe: waa in qofku samaysto jadwal nololeed wakhtiyaysan si uu u maareeyo shaqo kasta iyo wakhtigeeda; aadna ku qorto maalin walba hawshaad galayso, waxayna kuu saamaxaysaa inaad ahaato mid firfircoon, waxqabadna ku talaabsada. Qorshuhu waa waxa fududeeyaa suurtogalna ka dhigaa hawl culus, oo aysan macquul ahayn in hal mar la qabto. Qorshayta maalinla ahi waxay udub dhexaad u tahay firfircoonida iyo maaraynta hawlaha joogtada ah.

Cilmi baadhis la sameeyey ayaa lagu ogaaday in go’aaminta hawlaha shaqo ee maalintii ay habboon tahay in la dajiyo habeenka ka horreeya, qofkuna uu seexdo isagoo maskaxda ku haya qorshaha uu ku dhaqaaqayo ama shaqada u taalla waaberiga.

Waxaa la aaminsanayahy in tani ay yareyso wahsiga iyo isku dhex yaaca shaqada.

3. Seexo xilli hore habeenkii. Hurdada la seexdo habeenkii ayaa faa’iido ballaadhan u leh caafimaad qabka jirka iyo maskaxda. Waa mid ka dhigaysa jirka mid uu ka buuxo tamar uuna shaqsigu dareemo nasniino iyo nashaad. Maskaxda iyo jirka qofka ayaa awood u helaya inay wajahaan shaqo kasta oo adag. Seexashada xilliga hore ee habeenkii ayaa ka mid ah qodobbada lagu yareyn karo ama lagu dabar jari karo wahsiga.

4. ilaasho wakhtiga: dhammaan dadku way u simanyihiin wakhtiga. Kuwa guulaysta ee wax soo kordhiya ee naftooda iyo ummaddodaba guusha iyo badhaadhaha u horseeda looma badin, kuwa aan adduunka waxba ka qabsan ee ay noloshoodu hoosaysana lagu ma yarayn.

Qof walba oo adduunka ku nool Ilaahay waxa uu siiyay 24-saacadood maalin kasta. Kuwa guusha gaadha waa kuwa si fiican u maareeya wakhtigooda si habboonna uga faa'iidaysta aminta kooban ee ay haystaan. Halka kooxda kale ee nolosha ka dhacay ay wakhtigooda ku qaataan nolol wahsi, hurdo, meer'meer, meelo-fadhiisi, maxaa lalahaa iyo wax yaabo aanay wax faa'iido ah ka helayn.

Qof walba oo ilaashada wakhtigiisa wuxuu guusha uga dhawyahay ku kastoo wakhtigiisa dayaca. Dhibaatada ugu wayn ee bulshadeenna haysata ee aan lagu baraarugsanayn cid dareensanna ay yartahay ayaa ah maarayn la'aanta wakhtiga. Qorax kasta oo dhalataa waxay kuu sidaa waa cusub maalintaasi iyadaa kaa faa'iidi oo cimrigaagay ka jari muddo 24 saac ah ama aday guushu ku raaci oo qabsan shaqo ama hawl qarniyo badan oo dambe lagugu xasuusto. Wakhtigeenna aan ku bixinno wax aakhiro iyo adduun ina anfacaya.

4. inaad la saaxiibto dadka wanaagsan: la soco, la noolaw, ku dayo, dadkana ka dooro kuwa hadafka iyo himmadda sare leh, dadka go’aanka adag wax soo saarka leh ee wax xaqiiya.

Kana dheeraw oo hala socon hana la saaxiibin ku nolosha ka dhacay ee wahsada iska eeg cidda aad la soconayso iskana hubi cidda aad saaxiib ka dhiganayso. Sababtoo saaxiib waxa uu ku siiyaa waxa uu haysto, haddii aad la qaybsato waxa uu sito la mid baad tahay oo waxa uu yahay un baad latahay.

5. Dhiirigali naftaada: Dhirigalintu waa shidaalka ugu wanaagsan ee qof kasta ku shaqeeyo. Dhiirigali naftaada una balanqaad abaal marin haddii ay ka lib keento ama ay dhamays tirto hawlihii cuslaa ee aad u qorshaysay waajibna kaga dhigtay inay gudato. mararka

qaar ku abaalmari nafta waxyaabaha ay jeceshahay ee wanaagsan sida: dalxiiska, safarrada iyo waqti la qaadashada dadka la jecelyahay.

Wahsiga ayaa waxaa kale oo looga hortagi karaa habab ay kamid yihiin, kalsooni lasiiyo nafta, isbarida go’aan qaadashada, ku dhiiranaanta shaqada, iyo jeclaanshaha shaqada aad qabanayso.

Maanta ka dhigo maalintaad iska casishay (joojisay), xubinimadiii wahsiga, wax badan baad qabsan doontaa, in badanna waad raaxaysan doontaa.

In aad ka xorowdo wahsiga  waxay kugu qaadanaysaa waqti, waa inaad u samirtaa oo aad joogtaysaa ficilladaad ku baabinayso kagana hortagayso wahsiga.

Waqti kasta oo aad hore u qaado tallaabana waxaad dareemaysa culayskeeda iyo faa'iidadeeda ee waa inaad hore u socotaa oo aanad is dhiibin kana baxdaa xadka raaxada iyo is dhigashada.

ugu danbayn waxaan nafeheennna  kula dardaarmayaa inaan Eebe (SW) aan talo saarano, markastana aan ka  magan galno wahsiga iyo caajiska.

# DHAMMAAD